KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Muqdisho, 30 Maarso 1975 L. 3, R. 3

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

## W. M.

---

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Maarso 1975, L. 44 — *Billad lacag oo Hawlkarnimo.* Bog. 233

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Maarso 1975, L. 45 — *Billad Dahab ah oo Waddaninimo.* » 234

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Maarso 1975, L. 46 — *Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.* » 235

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 6 Maarso 1975, L. 47 — *Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.* » 237

---

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 6 Maarso 1975, L. 48 — *Billad Maar ah oo Hawl-karnimo.* Bog. 238

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAAN-KA, 6 Maarso 1975, L. 49 — *Billad Maar ah oo Hawl-karnimo.* » 240

---

# BOGGA SEDDEXAAD

## W. M.

# BOGGA LABAAD

# XEER

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 6 Maarso 1975, L. 44.**
**Billad Lacag ah oo Hawlèarnimo.**
**Xusuusta Jaalle Maxamada Xasan Aadan Gahayr.**

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 18ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIGELIYAY Sida Jaalle Maxamad Xasan Aadan Gahayr uu u gudan jiray xilka ka saaraa Dalkiisa tan iyo markii uu billaabay shaaqda Dawladda;

MARKUU TIXGELIYAY Kartida dheeraadka ah, xilkasnimada iyo hawlkarnimada aqoonta leh uu ku gudan jiray waajibaadkiisa wadaniga ah muddadii uu ka hayay Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Maamulka Sare, Isagoo si daacad ah u fulinaaya Mabaadi'da Kacaanka 21ka Oktoobar;

MARKUU TIXGELIYAY Sida uu Jaalle Gahayr naftiisa ugu hibeeyay guud ahaan in ay ka hirgasho Dalka Jamhuriyadda Dimoqaradiga Somaliya waxbarasha u qalanta Bulsho Kacaan Hantiwadaag ah, gaar ahaanna fulinta ujeedooyinka Kacaanku uu ka lahaa Ololaha Horumarinta Reer Miyiga xagga la dagaallanèa cadawga jahliga oo saldhig u ah dambaynta Bulshadeenna;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in xusuus gaar ah loo lahaado Geesiyaasha naftooda u hura danaha Dadkooda iyo Dalkooda;

MARKUU TIXGELIYAY Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

WUXUU GUDDOOMIYAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Lacag ah oo Hawlkarnimo Xusuusta Jaalle Maxamad Xasan Aadan Gahayr, Geesigii Dhallinyarada iyo Tacliinta Soomaaliyeed.

Muqdisho, 6 Maarso 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamad Siyaad Barre*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 6 Maarso 1975, L. 46.
Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.

## GUDDOONSHAHA
## GOLOHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida koowaad iyo Tanlabaad ee Kacaanka:

MARKUU ARKAY Sharciga 21ka Oktoobar 1969;

MARKU ARKAY Shargica Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 18ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY in Hay'ada ka mid ah xubnaha Dawladda ay ka qaateen kaalin aad u weyn Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, guulna ay ka gaareen, iyagoo isla markaas fulinaaya go'aannada Kacaanka 21ka Oktoobar Hirgelinayana mabda'a hantiwadaagga;

MARKU ARKAY Lagama maarmaan in ay tahay in Hay'adahaas kalinta weyn ka gaystay fulinta Ololaha Horumarinta Reer Miyiga lagu maamuuso aqoonsi gaar ah;

MARKUU DHEGEYSTAY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

### WUXUU GUDDOOMIYAY

### Qodobka Keliya

Hay'adaha hoos ku qoran waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo:

1. Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
2. Xafiiska Siyaasadda M.G.S.K.
3. Wasaaradda Caafimaadka
4. Wasaaradda Xannaanada Xolaha, Dhirta iyo Daaqa
5. Wasaaradda Warfaafinta iyo Hannuninta Dadweynaha
6. Xoogga Dalka Soomaaliyeed
7. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed

8. Gobolka Shabeellada Hoose

9. Gobolka Woqooyi Galbeed

10. Gobolka Jubadda Hoose

11. Gobolka Gedo

12. Gobolka Sannaag

13. Gobolka Bakool

14. Degmada Afgooye

15. Degmada Boorame

16. Degmada Baraawe

17. Degmada Gabiley

18. Degmada Qoryooley

19. Degmada Marka

20. Degmada Kismaayo

21. Degmada Jilib

22. Degmada Jamaama

23. Degmada Buur Hakaba

24. Degmada Buulo Buurte

25. Degmada Ceelbarde

26. Degmada Ceerigaabo

27. Degmada Laas Canood.

Muqdisho, 6 Maarso 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamad Siyaad Barre*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 6 Maarso 1975, L. 47.**
**Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.**
**Xusuusta Dadkii ku geeriyooday.**
**Shaqada Ololaha Horumarinta Reer Miyiga.**

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 18ka Oktoobar 1970;

MARKUU OGADAY In Jaallayaal ka mid ahaa Ciidankii Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ay ku geeriyoodeen goobaha shaqada iyago ku gudanaaya waajibaadi si daacadnimo iyo kacaanimo ah, fulinayana Mabaadi'da Kacaanka Oktoobar;

MARKU ARKAY Inay lagama maarmaan tahay in Dalku xusuus waarta u yeesho Ubadkiisa u hura lafahooda;

MARKUU DHEGEYSTAY Guddiga Dallacaadda iyo Abalmarinta Sharaf ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYAY

Qodobka Keliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo xusuusta Jaallayaasha hoos ku qoran oo ku geeriyooday shaqada Ololaha Horumarinta Reer Miyiga:

1. Jaalle Cabdi Xaaji Muuse (Arday);
2. Jaalle Cabdi Axmad Gundou (Guulwade);
3. Jaalle Maxamuud Maxamad Ibraahim (Guulwade);
4. Jaalle Cusmaan Maxamuud Nuur (Nabaddoon);
5. Jaalle Abuukar Saciid Amare (Nabaddoon).

Muqdisho, 6 Maarso 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Jaalle Maxamad Siyaad Barre*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 6 Maarso 1975, L. 48.
Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.
Xubnaha Guddigii u horreeyay ee Kacaanku u magacaabay Af-Soomaaliga.

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 65 ee 18ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYAY Sida xilkasnimada iyo kartida leh oo ay uga soo baxeen xilkooda Xubnaha Guddigii u horreeyay ee Kacaanku u magacaabay diyaarinta saldhigga qorista iyo hirgelinta Af-Soomaaliga iyo kaalinta weyn ay ka qaateen fulinta ballanqaadka ku xusan Qodobka, Xaashida Koowaad ee Kacaanka, Qaybteeda Siyaasadda Gudaha;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in Jaallayaasha iyaga ah loo aqoonsado kaalinta qiimaha leh oy ka geysteen hirgelinta afka Hooyo;

MARKUU DHEGEYSTAY Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta Sharaf ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYAY

Qodobka Keliya

Jaallayaasha hoos ku qoran oo ka tirsanaa Guddigii u horreeyay ee Kacaanku u magacaabay Af-Soomaaliga, waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.

1. Axmad Cali Abokor
2. Cumar Aw Nuux Maxamad
3. Sheekh Jaamac Cumar Ciise
4. Axmad Cartan Xaange
5. Maxamad Shire Maxamad

6. Muuse Xaji Ismaaciil Galaal
7. Shire Jaamac Axmad
8. Dr. Dahabo Faarax Xasan
9. Maxamad Xasan Aadan Gahayr
10. Axmad Faarax Cali «Idaajaa»
11. Cabdi Daahir Afey
12. Cabdullaahi Xaaji Maxamuud «Insaanlye»
13. Xuseen Sheekh Axmad Kadare
14. Yuusuf Sheekh Cali Samatar
15. Axmad Cabdullaahi Qaalib
16. Dr. Yaasiin Cusmaan Kenadiid
17. Dr. Saalax Maxamad Cali
18. Cabdullaahi Xaaji Abuukar Sheekh Axmad
19. Dr. Yuusuf Xirsi Axmad
20. Dr. Amad Ashkir Bootaan
21. Iikar Baana Haddaad

Muqdisho, 6 Maarso 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Jaalle Maxamad Siyaad Barre*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 6 Maarso 1975, L. 49.**
**Billad Maar ah oo Hawlkarnimo:**
**Madax iyo shaqqaale ku mutaystay O.H.R.M.**

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo Tan labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigaasu yahay 65 ee soo baxay 18ka Oktocbar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY Sida geesinnimada muranka lahayn iyo niyaadda daacadda ah ay ku guteen xilkii ka saaraa Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, Jaallayaal ka mid ah ciidankii Ololaha, iyegoo fulinaya go'aannada Kacaanka 21ka Oktoobar, hirgelinayana mabaadi'ida hanti-wadaagga;

MARKUU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in sii gaar ah loo maamuuso qof kasta oo ka geystsa kaalin weyn dhismaha iyo horukaca dalkiisa;

MARKUU DHEEGEYSTAY Go'aanka Guddiga Dallacaadda iyo Abaalmarinta ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU GUDDOOMIYAY

Qodobka Keliya

Jaallayaasha hoos ku qoran waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah ee Hawlkarnimo:

1. Cusmaan Cali Jaamac «Beenti» — Madaxda Xoghaynta G. Dhexe O. H. R. M.
2. Xasan Cilmi Cali — Kormeere Guddiga Dhexe O. H. R. M.
3. Ibraahim Macallim Mursal Cali — Kormeere Guddiga Dhexe O. H. R. M.
4. Ibraahim Maxamed Abyan — Kormeere Guddiga Dhexe O.H.R.M.
5. Axmad Nuur Yuusuf — Madaxda Ubaxa Kacaanka
6. Cabdulqaadir Maxamad Maxamuud — Madaxda Ubaxa Kacaanka
7. G. Sare Bile Rafle Guuleed — Guddoomiyaha Gobolka W. Galbeed
8. Daauud Sheekh Cabdulqaadir — Guddoomiyaha Waxbarashada W. Galbeed

9. Cabdi Maxamad Cilmi — Agaasinka X. Xoolaha W. Galbeed
10. Cumar Salaad Cilmi — Wakiilka XSMGSK Gobolka W. Galbeed
11. Dhamme Maxamad Xaaji Jimcaale — Guddoomiyaha Degmada Gabiley
12. Xasan Axmed Xuseen «Bile» — Guddoomiyaha Waxb. Degmada Gabiley
13. Dhamme Maxamad Yuusuf Axmad — Gudwdoomiyaha Degmada Boorama
14. Maxamad Maxamuud Maxamad «Nero» — Guddoomiyaha Waxbarashada Degmada Boorama
15. Jaamac Gaas Macow — Wakiilka XSMGSK Degmada Boorama
16. G. Sare Maxamuud Muuse Xirsi — Guddoomiyaha Gobolka Sannaag
17. Maxamed Axmad Xabad — Guddoomiyaha Waxbarashada Sannaag
18. Dhamme Cusmaan Rooble Maxamad — Guddoomiyaha Degmada Ceerigaabo
19. 2° X. Cabdirisaaq Sheekh Cusmaan — Guddoomiyaha Degmada Garadag
20. Ibraahim Maxamad Saciid — Guddoomiyaha Waxbarashada Degmada Qardho
21. Cabdullaahi Xasan Maxamuud — Guddoomiyaha Waxbarashada Mudug
22. Cali Calasow Madaxay Bagaxay — Agassinka X. Xoolaha Gobolka Mudug
23. G.le Warsame Xirsi Faarax — Guddoomiyaha Degmada Buulo Burti
24. L. X. Saciid Cali Baale — Guddoomiyaha Degmada Cadale
25. G. Sare Cabdalla Xaaji Axmad — Guddoomiyaha Gobolka Shabeellada Hoose
26. Maxamad Cabdulle Shiidle — Guddoomiyaha Waxbarashada Shabeellada Hoose
27. Shire Suudi Maxamad — Wakiilka XSMGSK Shabeellada Hoose
28. Suldaana Maxamad Caddow — Guddoomiyaha Waxbarashada Shabeellada Hoose
29. Cumar Xaashi Nuur — Agaasinka Caafimaadka Degmada Marka
30. Seynab Maxamad Yaxya — Guddoomiyaha Waxbarashada Afgooye
31. Xuseen Xaashi Xuseen — Wakiilka XSMGSK Degmada Afgooye